**Shuruudaha faahfaahsan (soo gudbi dokumentiyo cadeynaya shuruudahan)**

Tartamayaasha ka soo gudba shuruudaha hordhaca ah waxaa lagu kala saarayaa shuruudo faahfaahsan oo ah sidan soo socota:

1. Caddeynta khibradda shirkaddu u leedahay hawlahan oo kale (Tax ugu yaraan 3 shaqo oo hore oo aad si wanaagsan u qabatay iyo cidda aad la gashay heshiiskaa).
2. Nooca diyaaradda ku haboon rakaabka iyo mid xamuulka ah (Sheeg modelka, tixraaca diyaaradda, sannadka la soo saaray, shahaadooyinka caddeynaya tayada diyaaradda, iwm).
3. Shaqaalaha ka shaqeynaya hawsha (Soo gudbi CV-yada Mas'uulka shaqadan aad ugu talogashay, Pilot-ka iyo Engineerka).
4. Adeegyada dheeraadka ah ama qaabka shaqo (Tax agabka rarista iyo dejinta iyo gaadiidka shaqaalaha iyo agabka ka soo qaada magaalada oo geeya garoonka diyaaradaha ama ka soo qaada garoonka oo geeya magaalada)
5. Wakhtiga ay shirkaddu ku qaban karto hawsha (Sheeg haddii waqtigaagu waafaqayo waqtiga Wasaaraddu ugu talogashay in shaqadan la qabto iyo in kale).
6. Awooda dhaqaale ee shirkadda (Soo gudbi warbixin bangi "bank statement")
7. Qiimaha shirkaddu ku qabaneyso hawsha oo faahfaahsan, u soo gudbi saddex siyaabood:
   - Qiimaha magaalo walba ee 1kii tigidh iyo 1kii kilo ama
   - Diyaarad xamuul ah iyo mid rakaab ah oo ah "multi-leg" oo u daabula xamuulka iyo shaqaalaha magaalooyinka taas oo middiiba tahay 1baloog "11saac ah" maalinta hore iyo 1 baloog "11saac ah" maalinta soo celinta, baloogyada waxa aad u qeybin kartaa laba maalmood, shirkadaha kalena waxa aad la geli kartaa heshiis hoosaad "subcontract" meelaha qaar haddii Wasaaraddu ogolaato laakiin mas'uuliyadda shaqada sinaba kaama wareegi karto.
   - Intaa waxa dheer, soo gudbi Qiimaha gaadiidka dhulka oo ah magaalada illaa iyo garoon diyaaradeed walba oo ay ku jirto Muqdisho (Qiimaha halkii gaadhi ee halkii magaalo).

**Booqashada**

Xulashada waxa ka mid noqon doonta qiimeyn ka dhalata booqasho lagu soo eego diyaaradda/agabka iyo xarunta shirkada si loo ogaado in qandaraaska shirkaddu soo gudbisay uu run yahay.

**QAABKA UU U DHACAYO TARTANKU:**

1. Dhammaan tartamayaashu waxa ay soo gudbinayaan codsi tilmaamaya qiimaha guud iyo laba baqshadood oo xiran oo midi ku jiraan waraaqaha farsamo midna ay ku jiraan waraaqaha qiimaha kadibna ku sii dhexjira bashqad sare (saddexda oo kala gaar ah) waxayna ku ridayaan sanduuq xiran oo yaalla Xafiiska Maamulka iyo Maaliyadda ee Wasaaradda, **Xarunta Km5 ee Waddada Afgooye,** ugu dambeyn **25/Apr/2019, 9:00subaxnimo**

2. Maalin loo asteeyey ayaa la wacayaa dhammaan tartamayaasha, baqshad kastana waxaa lagu hor furayaa wakiillada shirkadaha tartamaya si daahfuran waxaana lagu dhawaaqayaa magaca iyo qiimaha shirkad walba.

3. Intaas kadib, guddiga ayaa qiimaynaya tartanka iyada oo aysan la joogin tartamayaashu, waxaana shir dhacaya maalmo kooban gudahood lagu dhawaaqayaa natiijada shirkadda ku guuleysata tartanka.